

Sidaa darteed wa inay caruurto u tagaan dugsiga

Wadano badan oo dunida ka mid ah caruurto guryaha ayey joogaan cudurka covid19 dartiis, hase yeeshe dalka Iswiidhen caruurto dugsiga ayey tagaan.

wadano badani waxay doorteen inay bulshada xidhaan ama xanibaan, dadka karantiin ayaa la geliyey waxaa keliya ee ay u bixi karaan inay raashin soo iibsadaan ama yara jimicsadaan. waa sharci adag oo qofkii jabiya u keen kara ganaax lacageed iyo ciqaabo kale

Dalka Iswiidhan bulshadu wey isu furantahay. Halkii dadka lagu xayiri lahaa guryahooda waxaa bulshada la siiyaa warbixin faah-faahsan si ay dadku u kala gartaan wixii sax ah iyo wixii qalad ah. dhamaan waa in la ogaado sidii ay dadku naftooda uga illaalin lahaayeen cudurka isla markaasna ay bulshada kale uga dhowri lahaayeen inuu gaaro.

Dawladda iyo hay'adda cafimaadku waxaa keliya oo ay mamnuucaan waxyaalaha aan aad loogu baahnayn. arrimahaasi waxaa ka mid ah inaan la booqan karin guryaha dadka waayeelka lagu xanaaneeyo

(äldreboende), Haddii dadka waayeelka ahi cudurka qaadaan si xun ayey u bukoon karaan weyna u dhiman karaan. cudurkan.

Caruurto waa inay dugsiga aadaan

Bilowgii dhibaataada cudurka dawladdu waxay go'aamisay in ardayda dugsiyada sare iyo kuwa jaamicaduhu guryaha wax ku bartaan. Dugsiyada hoose/dhexe sidaas way ka duwan yihiin. Waxaa jira sharci dhigaya in dhammaan caruurto dugsiyada hoose/dhexe aadaan dugsiyada oo waalidku go'aan kale ma laha oo dugsiga kama joojin karaan caruurtooda. Caruur aan badnayn ayaa cudurka si fudud u qaada. Sidaas daraadeed dusiga way joogi karaan. Hase yeeshe waxaa jira sababo kale oo caruurto dugsiga u aadi karaan. Dhammaan caruurta guriga wanaag kuma wada haystaan, Sidaa darteed waxaa loo arkaa in dugsigu yahay meesha ugu fiican ee ay cunto ka heli karaan, saaxiibo iyo xannano dad waayeel ahi kula kulmi karaan. Waxaa kale oo muhim ah inay waalidku shaqada wadan karaan, gaar ahaan waalidiinta ka shaqeeya dhakhtarada, booliiska, shirkadaha iyo wixii la mid ah. Ma jiraan qorshyaal lagu xidhayo dugsiyada hoose. Haddiise ay dawladda iyo hay'adda caafimaadku wax bedelaan waxay u sheegaan war-ibaahinta, dawladda hoose iyo dugsiyada oo iyaguna u sii sheega waalidka iyo caruurta.



Hay'adda ka hortaga masiibooyinka ee gobolka Kalmar waxay wada shaqen ka dhaxaysaa dhammaan degmooyinka gobolka Kalmar, Maamulka iyo dhammaan hay'adaha dawliga ee gobolka ka jira. Dhibaataada ku timaada mujtamaca wadajir ayaa loo go'aamiyaa la iskana kaashada. Hadda waxaa intii suurtoogala si fiican loola tacaalaya cudurka corona.



VÄSTERVIKS
KOMMUN



facebook.com/krissamverkan.kalmar
facebook.com/vastervikskommun